



Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/419/B-10/20

Taariikh: 02/04/2020 التاريخ

TACSI

إنا لله وإنا إليه راجعون

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu si tiiraanyo leh uga tacsiiyeynayaa geerida xanuunka badan ee ku timid Ra'iisul Wasaarihii hore ee Soomaaliya **Mudane Nuur Xasan Xuseen (Nuur Cadde)** dhammaan Ummadda Soomaaliyeed iyo qoyska iyo ehelada uu ka tegay Ra'iisul Wasaaruhu. Waxaan Ilaahay uga baryeynaa in uu u naxariisto kuna martiqaado Jannadiisa qaaliga ah.

Sida oo kale, Goluhu wuxuu murugada la qeybsanayaa dhammaan qoysaska Soomaaliyeed ee ku sugan qurbaha ama gudaha Dalka, kuwaas oo ay eheladoodu ku geeriyooden ama uu hayo xanuunka Dunida sida xowliga ah ugu faafaya ee Coronavirus.

Iyada oo Dunidu la tacaalayso cudurkan iyo cawaaqibka ka dhalan kara, waxaa nala gudboon in aan u midowno ka-hortagga cudurkaan ba'an iyo samata-bixinta Ummadeenna Soomaaliyeed xilligan adag oo looga gudbi karo oo kaliya dedaal dheeraad ah, iskaashi loo dhan yahay iyo gacan-qabashada dadkeenna danyarta ah.

Allaha noo gargaaro.

Senator Abshir Maxamed Axmed
Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Aqalka Sare
Ahna Ku simaha Guddoomiyaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

